EDEN PRAIRIE SCHOOLS

Educating for success in our diverse and changing world.

Habraaca Adeegyada Gaadiidka Khaaska ah

Xogta Waalidka/ daryeelayaasha ee ardayda u baahan adeeg gaadiid khaas ah



Warbixin Guud ee Adeegyada Gaadiidka Khaaska ah

Mararka qaar waa daruuri in loo diyaariyo gaadiid khaas ah ardayda, marka taas la samaynayo, waxaan aad isugu tax-alujinnaa inaan ballanqaadno in arday kastaa helo taakulo habboon iyo tixgelin badqabkiisa/keeda iyo ciskooda intay shitaawaha saaran yihiin. Si aan u hubinno in daryeelkaas loo fidiyo, waxaa lagama maarmaan ah in dhammaan laga wada shaqeeyo—arday, waalid, ama daryeelaha, dugsiga, wadaha shitaawaha, iyo kalkaaliyeyaasha, Adeegyada Taakulada Ardayda iyo Waaxda Gaadiidka. Habraaca iyo nidaamyada warqaaddaan lagu sharraxay waxaa loogu talo galay ardayda raacaysa shitaawayaasha Adeegyada khaaska ah. Qawaaniinta kilinka ee habdhaqanka ardayda kolkii ay shitaawaha la socdaan waxaa laga heli karaa Nuqulka Raacista Shitaawe Dugsiyeedka.

Miyey ardayda waxbarashada khaaska ah oo dhammi raacaan shitaawayaasha khaaska ah?
Waxaa gaadiid khaas ah leh ardayda u baahan sababtuna tahay curyaannimo darteed ama meesha barnaamijkoodu yahay. Haddii kale, waxay raacayaan shitaawaha caadiga ah ama way usoo lugaynayaan dugsiga. Adeegga gow-ka-gow waxaa diyaarin kara waaxda gaadiidka ee ardayda u baahan. Xaalad kasta oo adeeg gaadiid waxaa darsi doona hab shakhsi ahaaneed kooxda IEP (Individualized Education Plan). Kooxda IEP ayaa go'aansanaysa nooca baahida gaadiid. Heer-ka u degsan badbaadada shitaawaha ayaa had iyo goor la raaci doonaa.

Goormuu raacista shitaawaha ilmahaygu bilaaban doonaa?
Waa in laba arji lasoo buuxiyaa lana helaa oo waaxda gaa-diidku heshaa ka hor intaan marin shitaawe la qoondayn. Xubin ka tirsan kooxda Adeegyada Khaaska ee ardaygaaga ayaa buuxin doona Arjiga Codsiga waana inaad buuxisaa arjiga Caafimaadka Degdegga Shitaawaha.

Markii ay araajidoo buuxda waaxda gaadiidku hesho, ayaa lagu dadaalayaa in marin loo jeexo sida ugu dhakhsaha badan ardaygaaga. Cadadka dadka kala duwan ee u baahan in lagu wargeliyo aawadeed (wadaha, kaaliyaha shitaawaha, waalidka iyo dugsiga) waxaa laga yaabaa inay qaadato ilaa shan cisho oo maalmo shaqo ah in shitaawaha lagu diyaariyo.

Hadday noqoto shan cisho oo maalmaha shaqada ah ama ka yar intaan dugsiga bilaaban, waxaa laga yaabaa inaan marinka shitaawuhu bilaaban inta ka horraysa bilowga jiilaalka. Had-day taasi dhacdo waalidka/daryeelaha waxaa laga yaabaa in la waydiisto inuu soo qaado ilmaha ugu badnaan qiyaastii shan cisho oo dugsi.

Ardaygaygu ma isku shitaawe buu raaci doonaa had iyo goor?
In allaale intii suurtogal ah waaxda gaadiidku waxay isku dayi doontaa inay joogtayso raacista ardayda ee isla hal shitaawe. Si kastabase ha ahaatee, arday baa laga yaabaa in lagu daro kuwo kalena laga saaro barnaamijka inta sannad dugsiyeedku socdo; sidaas aawadeed, waqtiga soo qaadista ama keenistu waa isbeddeli karaa si xilliley ah. Horaa laguugu soo wargelin doonaa wixii isbeddel ku yimaada waqtiyada soo qaadista iyo soo celinta iyo wixii isbeddel joogto ah oo ku yimaada shitaawaha ama wadaha.

Wixii soo daahis ah ka warran?
Kaddib dhowrka cisho oo dugsiga ugu horraysa, xilliyada soo qaadista iyo soo celinta waa inay kusoo ururraan daaqad 10 daqiiqo ee jadwalkaaga (tus: soo qaadis ah 8:30 a.m.–waa shitaawuhu yimaadaa inta u dhaxaysa 8:25 iyo 8:35 a.m.). Haddii shitaawuhu jabo ama dib u dhac ku yimaado muddo dheer, waxaa laysku taxallujinayaa in talephone lagula soo xiriiro waaliddiinta. Dugsigana waa lala xiriiri doonaa.

Ardaygayga ma laga qaadi karaa/soo celin karaa cin-waan kale?
ardayda waxaa laga yaabaa in cinwaan kale oo aad dooratay laga qaado/soo celiyo meeshaas kale, sida cid ilmaha kuula joogta ama xarunta barbaarinta dhallaanka. Tanina waxay ku taxaluqdaa xaalad maalin walba joogto u ah ee waa inaysan noqon xaalad googoos ah ee mar uun soo baxda.

Cinwaankaas kale waa inuu ahaadaa meelaha caamka ah ee aqalka ardayga iyo inuu ka mid yahay soohdinta dugsiga gudeheeda.

ardayda lagama soo qaadayo/celinayo cinwaan rug ganacsi.

Haddii xaalad degdeg ahi timaaddo, waalidka ayaa ka ma-suul ah inuu ruux kale shitaawaha la kulmo si ilmaha loogu wareejiyo. Fadlan soo wargeli xafiiska gaadiidka haddii aad filaysid in xaalad degdeg ahi imaanayso.

Maxaan waxaan oo waraaqo ah u buuxinayaa?
MN Rule 7470.17.00 qaynuunkaa ayaa faraya in wa-daha shitaawe kasta iyo kaaliyihiisu ee qaadaya ilma curtain ah haystaan xogta asalka ah ama ay dhakhso ugu heli karaan xiriir gudub ah; Magaca ardayga, cinwaanka, nooca curyaannimada, xogta daryeelka caafimaadka degdegga ah iyo magacyada lagala xiriirayo xaaladda degdegga ah iyo lambarrada tele-phonerekooda oo uu weheliyo dhakhtarku.

Xogta saxda ahi waxay noo saamaxaysaa inaan sida ugu fiican u daboolno baahiyaha ardaygaaga.

Hore ugu soo wargeli waaxda gaadiidka mar kasta oo uusan ardaygaa-gu shitaawaha raaci doonin ama gelinka hore ha ahaato ama gelin ka danbe adigoo soo wacaya gaadiidka ugu yaraan hal saac ka hor waqtiga jad-walkaagu yahay.

(952) 975-7500.

TRANSPORTATION DEPARTMENT

Eden Prairie Schools ISD 272
Transportation Department
8055 Wallace Road
Eden Prairie, MN 55344

Phone: 952-975-7500
Fax: 952-975-7520

Transportation 08/2008

Xogtaan Ha Moogaan

Mas'uuliyadaha Waalidka/ Daryeelaha

Dhammaystir Arjiga Khaaska Gaadiidka #66. Kusoo wargeli gaadiidka sida ugu dhakhsaha badan xogta wixii isbeddel ah. Arjigaan waa in la buuxiyaa sannad walba. Gaadiid lama siin karo iyadoon arjigaan galka ku jirin.

Waa in dhammaan ardayda si cimilada ku habboon loogu soo labbisaa isla markaana ay diyaar u yihiin inay shitaawaha soo koraan shan daqiiqo ka hor jadawalka waqtiga qaadista. Shitaawayaashu joogsiga cidna kuma sugayaan xilliga qaadista kaddib; sidoo kalena shitaawuhu ma baxayo ka hor xilliga qaadista. Isku cuyubnaanta jadwalka shitaawayaasha ardayda curyaamada ah darteed uma saamaxayso waqti sugitaan, talephone diraan ama hoon kuu yeeriyaan. Waxaad u baahan doontaa inaad ilmahaaga dugsiga usoo qaaddid markuu baska seego xilligiisa qaadista.

Ardaygu ha u diyaarsanaado raacista shitaawaha shan daqiiqo ka hor xilliga qaadista

Waaliddiinta/daryeelayaasha waxaa lagu boorrinahayaa inay kusoo wargeliyaan waaxda Gaadiidka in ardayga dugsiga loo qaaday kaddib xilliga qaadista gelinka hore. Taasi waxay wadaha ogaysiinaysaa inuu u baahan yahay inuu gelinka danbe guriga usoo qaado. Hubi in ardayga aqoonsiyadiisu u xiran yihiin. Ogow cadadka = shitaawaha iyo magaca dugsiga ardaygaagu aado.

waalidka/daryeelaha ayaa mas'uul ka ah caawinta ardayga guriga ilaa shitaawaha gelinka hore iyo sidoo kale shitaawaha ilaa guriga gelinka danbe. Tani waxay sidoo kale khusaysaa ilmaha gaariga gacanta lagu kaxeeyo.

Waa inay gaari gacanka si habboon u dayactiraan waalidku uuna u diyaarsan yahay ku qaadista shitaawaha had iyo goor. Haddii uusan gaari gacanku heerka badqabka ku samayn lama qaadi karo.

Kusoo wargeli Gaadiidka waqti kasta uusan ilmuhu shitaawaha raacayn. **Fadlan soo wac ugu yaraan saacad ka hor xilliga jadwalkaaga. (952) 975-7500.**

Waa in Gaari gacanka ay ku rakiban yihiin suunka dhexda iyo celiye saani u shaqaynaya. Gaarigacanka korontada ku shaqeeya waa inuu isticmaala bateri wixii ku balqada u dul leh.

Ardaygaaga ugu imow markii guriga laga qaadayo/ celinayo. Hadday xaalad degdeg ahi timaaddo oo kaa iska hortaagaysa inaad meeshaas waqtigeeda ku timaaddid. La xiriir Gaadiidka sida ugu dhakhso badan si ay xaaladdaada degdegta ahi kaaga furato la kulanka ardayga. Haddii aan adiga iyo xiriirkaaga degdegta ah toonna la waayo,waxaa laga yaabaa in ilmahaaga lagu celiyo Waaxda Badbaadada Dadwaynaha ee Eden Prairie (952) 949-6200).

Hadduu cunuggaagu dugsiga ku jirrado, iswasakheeyo isagoo ama isku kaadiya ama isku saxaroodo, ama sabab kale darteed aan shitaawe lagu soo qaadi karin, adiga ayaa lagaa filanayaa inaad dugsiga kasoo qaaddid/keentid. Si aad ilmahaaga badqab shitaawaha ugu haysid waxaad kasoo caawin kartaa anshaxa wanaagsan ee shitaawaha. Dhammaan ardayda waxaa laga fishaa inay raacaan qawaaniinta shitaawaha.

Barafka ka bannee marinnada si aad ugu fududaysid badbaadada dhaqaaqa ilmaha ee shitaawaha.

Fadlan soo wac mar walba oo uusan ilmahaagu shitaawaha raacayn.

Kala shaqee wadaha iyo dugsiga markii xaalad badbaadada ku lug lihi kusoo foodsaarto. Dhakhso ula soo socodsii wixii shiddo ah waaxda gaadiidka.

Kusoo wargeli waaxda gaadiidka mar walba oo uusan ilmahaagu shitaawaha raacayn. Saddex cisho oo wicid la;aan ahi waxay sababi kartaa in adeegga shitaawuhu kaa istaago. Waxaa adeegga shitaawaha dib loogu soo fasixi karaa adigoo lasoo xiriirayaa waaxda Gaadiidka una oggolaanaya muddo ilaa shan cisho ah oo dib marin shitaawe laguugu dejinayo.

Mas'uuliyadaha Wadaha iyo Kaaliyaha Shitaawaha Dugsiga

Wadayaasha shitaawayaasha dugsiga waa khabiiriin xirfaddooda waxaana u weheliya tababar dheeraad ah iyo Shatiga Wadista Ganacsiga. Waxay u shaqeeyaan Kilinka Dugsiyada. Iyagaa ka mas'uul ah nabadgelyada iyo habsami u qaadista ardayda iyo ku haynta jadwalkooda. Haddii aan kaaliye shitaawe jirin, wadaha ayaa xilkii kaaliyaha qabanayo. Kaaliyuhu wuxuu wadaha kala shaqeeyaa sidii loo xaqiijin lahaa nabadgalayada ardayda ee shitaawaha. Waduhu wuxuu isku taxalujinayaa inuu ardayga kusoo qaado jadwalka maalinlaha ah waqtigiisa. Markuu iskudaygaas muujiyo, waduhu uma soo noqonayo inuu ardayga qaado maalintaas. Wadaha waxaa kaloo ku xiran arday kale iyo dugsiyo kale. Caawi dejinta iyo saarista ilmahaaga, haddii loo baahdo.

Xaqiiji in suunka dhexda, celiyaha gaari gacanku xiran yihiin. Joogtee akhlaaqda fiirina in ardaygu ku egyahay kursigiisa kuna soo wargeli wixii shiddo ah dugsiga. Sida ugu dhakhso badan ugu soo wargeli Warbixinta Akhlaaqda Ardayga. Warbixinta waxaa loo gudbin doonaa maamulka dugsiga ee ku habboon si ay baaritaan ugu sameeyaan, iyadoo ku xirnaan doonta ba'naanta arrinta, tallaabooyinka la qaadi karona waxaa ka mid ah ka saaris maamuuska raacista shitaawaha. *Kaaliyeyaasha shitaawaha ayaa loo dira meeshii hadba looga baahdo nabadgelyo haseyeeshee shitaawe kasta ma saarna.*

Kaaliyeyaasha shitaawuhu waxay ardayda kala shaqeeyaan meelaha shitaawaha gudihiisa iyo hareerihiisa ah. Ma kaalin karaan wixii gowga waddada dhaafsiisan.

Ku wargelinta waaxda gaadiidka haddii aan cid ilmaha qaabishaa guriga joogin si uu waduhu marinkiisa usii wato isagoo ardayga u hubinaya in la daryeeli doono.

Maamule gargaarka degdegga ah, ayaa haddii loo baahdo, marka loo eego qawaaniinta sharciga Good Samaritan Law 604.05 iyo u doonista kaalmada caafimaadka degdegga ah markii loo baahdo. Kusoo wargelinta waaxda Gaadiidka dhammaan wixii dhaawac ah. Haynta warbixinta caafimaad degdegga ah ee ardayga shitaawaha iyo waxay kaloo ogsoon yihiin baahiya khaaska ah iyo wixii dhib ku ah ilmaha.

Kaala soo xiriiraan adiga iyo dugsigaba wixii ilmahaaga ku saabsan.

Waxay ka qayb galaan tababarrada khaaska ah ee la dhaqanka anshaxa ilmaha iyo xaaladaha khaaska ah ee ardayda markay shitaawaha saaran yihiin.

Mas'uuliyadaha Waaxda Gaadiidka

Inay u qoondayso ardayda Adeegyada khaaska ah shitaaweyaal qaada.

Isticmaasho xogta caafimaadka degdegga ah ee shitaawaha markay ilmahaaga wadaan. Usoo bandhigaan qalab khaas ah markay ilmahaaga qaadayaan. Inay taabbageliyaan wixii dhib ah oo ad qabtid. Ay u dhexeeyaan waaliddiinta/kaaliyeha, dugsiga iyo wadaha shitaawaha haddii ismaandiid yimaado. Kaalmeeyaan usoo bandhigista tababar adeegenimada ee wadeyaasha iyo kaaliyeyaasha.

Inay qaadaan tallaabooyin ay ugu qoondaynayaan korjooge ardayda ee Waaxda Badbaadada Dadwaynaha ee Eden Prairie (952-949-6200) haddii aysan waaxda Gaadiidku kaala soo xiriiri karinin xiriirkaaga degdegga ah.

Mas'uuliyadaha Waaxda Taakulaynta Adeegyada Ardayda

Hore ka siinta xogta ardayda cusub ee la qaadayo sida ugu dhakhsaha badan. Wargelin hore oo shan cisho ah ayaa looga baahan yahay in wax laga beddelo marinka jira iyo in loo qoondeeyo ardayda cusub marin shitaawe ku habboon. In loosoo bandhigo xogta caafimaadka si loo siiyo wadeyaasha iyo kaaliyeyaasha qaada ardayda baahida khaaska ah. In lagu caawiyo maamuleyaasha dhismeyaasha ama uqaybsaneyaasha anshaxa ardayda ee saamaynaysa nabadgelyada ardayda Baahida Khaaska ah ee shitaawaha. Ku caawiyaan waaxda gaadiidka qabashada barnaamijka tababarrada adeegga ee wadeyaasha shitaawaha iyo kaaliyeyaasha u adeegaya ardayda baahida khaaska ah.

Waxyaabaha siyaadada ee u baahan inaad maanka ku haysid

BEDDELAAD CINWAAN

Haddii aad guurtid inta lagu jiro sannad dugsiyeedka, waa inaad la xiriirta gaadiidka iyo dugsiga ardaygaaga ugu yaraan toddobaad ka hor si aad u xaqiijisid inaan adeegga shitaawaha ee ilmaha laga dhaqan. Dugsiga wuxuu ku wargelin doonaa xafiiska waxbarashada khaaska ah si isbeddelka loogu gudbiyo waaxda gaadiidka.

WAXBARASHADA GURIGA IYO FARRIIMAHA GURIGA IYO DUGSIGA

Shaqaalaha gaadiidka kama mas'uul aha gaarsiinta farriimaha, xusuusaha. kwd. Ee guriga iyo dugsiga. Waaliddiinta iyo shaqaalaha dugsiga ayaa si toos ah uga wada xiriiri doona.